Heerka Aasaasiga ah ee
BANI-AADMINIMADA

# Heerka Aasaasiga ah ee Bani'aadamnimada ee ku saleysan Tayada iyo La Xisaabtanka.

**Waxaa daabacay:** Isbahaysiga CHS, Kooxda URD iyo Mashruuca Sphere.

**Daabacaaddii koowaad:** 2014

Tani waa turjumaad aan rasmi ahayn oo ah nuqulkii asalka ahaa ee Af-Ingiriisiga, taas oo ay daabaceen isbahaysiga CHS Alliance, Groupe URD iyo Sphere. Daabacaadan waxaa si madaxbanaan u turjumay ururada soo socda: Social Development Direct iyo Translators without Borders. Kooxda CHS mas'uul kama aha tayada iyo saxnaanta tarjumaadan.

© Xuquuqda daabacaadu way xifdisan Xuquuqda daabacaadda ee waxa ku jira halkan waxaa iska leh CHS Alliance, Group URD iyo Mashruuca Sphere. Waxaa loo soo sarii karaa ujeedooyin waxbarasho, oo ay ku jiraan tababarka, cilmi baarista iyo waxqabadyada barnaamijka, iyadoo la oggol yahay in la aqoonsanayo Heerka Aasaasiga ah ee Bani'aadamnimada ee ku saleysan Tayada iyo La Xisaabtanka. Si loo turjumo ama loo waafajiyo dhammaan ama qayb kasta oo ka mid ah Heerka Aasaasiga ah ee Bani'aadamnimada ee ku saleysan Tayada iyo La Xisaabtanka, waa in la helaa ogolaansho oo qoraal ah ka hor adoo iimaylka u diraya info@corehumanitarianstandard.org

## Hordhac

Heerka Aasaasiga ah ee Bani'aadamnimada ee ku saleysan Tayada iyo La Xisaabtanka (CHS) waa natiijada tooska ah ee Hindisaha wadajirka heerarka (JSI) kasoo Iskaashiga Isla-Xisaabtanka Bani'aadamnimada (HAP) Caalamiga ah, Dadka kujira Gargaarka iyo Mashruuca Sphere (Wareegga) isugu geeyeen awoodo si ay isticmaalayaasha heerarka bani'aadamnimada ugu raadiyaan u hoggaansanaan weyn. JSI waxay tashaday in ka badan 2,000 oo shaqaale samafal oo xafiisyo madaxeed ah, gobolo iyo dalalka u nugul masiibada,

Jawaab-celinta waxay muujisay baahida loo qabo iswaafajinta heerarka, iyada oo ay bulshooyinka iyo dadka ku tabaaloobay xasaradaha bartamaha yihiin mabaadi'da bani'aadamnimaduna tahay aasaaska.

CHS waa natiijada 12-bilood, wadatashi saddex-heer ah, kaasoo inta lagu gudajiray shaqaalaha samafalka, bulshooyinka iyo dadka ay xasaraddu saameeysay, boqolaalo Hay,adaha Aan-Dawliga ahayn (NGOs) iyo shabakado, dowlado, Qaramada Midoobay iyo hay'adaha deeqaha bixia, iyo aqoonyahano ayaa si adag u falanqeeyay waxa uu ka-koobanyahay CHS waxayna ku tijaabiyeen heerarka xarunta dhexe iyo goobta shaqo..

Kadib waxaa la tixgeliyay jawaab-celinta wadatashi kasta dib-u-eegistana waxaa ansaxiyay kooxda latalinta farsamada ee 16ka-qofood ah ee mataleysa waaxyaha balaaran iyo aaggagga khibradda farsamo gargaarka bani-aadminimo iyo horumarinta heerarka.

Ujeeddada guddiyada Iskaashiga Isla-Xisaabtanka Bani'aadamnimada (HAP) ee Caalamiga ah, Dadka katirsan Gargaarka iyo Mashruuca Sphere (Wareegga) waxay tahay in CHS ay beddeli doonto Heerka Iskaashiga Isla-Xisaabtanka Bani'aadamnimada 2010ka ee Isla Xisaabtanka iyo Maareynta Tayada, Xeerka dhaqan wanaagsanaanta Maareynta ee Dadka katirsan Gargaarka iyo Taageerada Shaqaalaha Gargaarka iyo waaxda Heerarka udub-dhexaadkaah ee Buug-gacmeedka Sphere

## Mahadna

Waad ku mahadsan tihiin boqolaalka hay,adood iyo shaqsiyaadka ka soo qayb qaatay horumarinta CHS ayaga oo kasoo jawaab celiyay qabyo-qoraalyadad CHS, ayaga oo ku tijaabinaya gudaha hay,adahooda[1], ama kaqeybgalaayo mid kamid ah kooxaha kormeerayey geedi socodka wadatashiga CHS. Ka qayb qaadashada bulshooyinka kala duwan iyo dadka ay dhibaatadu saameysey ee ku saabsan geeddi-socodka wadatashiga iyo baaritaanka ayaa si gaar ah loo soo dhoweeyey.

Dadaalladooda ku aaddan iswaafajinta heerarka, Iskaashiga Isla-Xisaabtanka Bani'aadamnimada ee Caalamiga ah, Dadka katirsan Gargaarka iyo Mashruuca Sphere (Wareegga) waxaa kusoo biiray Groupe URD kaasoo CHS ku dhafay shaxda tixraaca COMPAS. Kooxda talo bixinta Farsamada CHS iyo koox hoosaadkeeda, Gudiga iskudubaridda Farsamada, ayaa mas'uul ka ahaa kormeerka hanaanka wadatashiga iyo ansixinta ugu dambeysay CHS. Kooxda Qoraalka CHS waxaa laga hool geliyay dib-u-eegista CHS ayaga oo ku daraayo jawaab-celinta laga helay heer kasta oo wadatashiga ah.

Si loo hubiyo in natiijooyinka la gaadhay ay ahaayeen kuwo loo dhan yahay, leeyahiin matalaad iyo ujeedo, hanaanka wadatashiga CHS waxaa si madaxbanaan u fududeeyay Lataliyayaasha WolfGroup.

Liiska buuxa ee xubnaha Kooxda Farsamada ee talo-bixinta, Kooxda iskudubaridda Farsamada iyo Kooxda Qoraalka waxaa laga heli karaa www.corehumanitarianstandard.org . taageradooda hagar la'aanta ah la,aanteeda, la-tashiga CHS ma uusan suuragaleen.

Geeddi-socodka Xuddunta Heerarka Bani'aadamnimada waxaa si deeqsinimo leh loogu taageeray iyada oo loo marayo aasaaska iyo maalgelinta mashruuca deeq-bixiyeyaasha soo socda: Waaxda Arrimaha Dibadda iyo Ganacsiga ee Dowladda Australia; Wakaaladda Katooliga ee Horumarinta Dibadda (CAFOD);

wasaaradda arrimaha dibadda ee Danmark (Danida); Xafiiska Dibadda ee Jamhuuriyadda Federaalka Jarmalka; Gargaarka Irish; Wakaaladda Iskaashiga Caalamiga ee Horumarinta Sweden; Wakaaladda Horumarinta iyo Iskaashiga ee Switzerland; UK Aid oo ka socota Dowladda UK; iyo Dowlada Mareykanka

[1] Liis buuxa oo ka mid ah hay, adaha tijaabiyay CHS waxaa laga heli karaa www.corehumanitarianstandard.org

Iskaashiga Isla-Xisaabtanka Bani'aadamnimada ee Caalamiga ah, Dadka katirsan Gargaarka iyo Mashruuca Sphere (Wareegga) waxay sidoo kale u mahadcelinayaan xubnaha gudiga ee soo socda tabarucaadooda maaliyadeed ee geeddi-socodk CHS: ACT Isbahaysiga; Hay'adda ActionAid ee Caalamiga ah; Aktion Deutschland Hilft; Laanqeyrta Cas ee Ingiriiska; Hay,adda Katooliga ee Horumarinta Dibadda (CAFOD); CARE International; Gargaarka Christian; Beesha Caalamka Adeegga Aasiya; DanChurchAid; Xiriirka Adduunka ee Lutheran; Badbaadinta Carruurta Caalamiga ah; Badbaadinta Carruurta Mareykanka; iyo World vision caalamiga ah.

## Jawaab celin

Faallooyinka kusaabsan CHS waa la soo dhaweynayaa waqti kasta, waxaana loo diri kara, oo ay weheliyaan weydiimaha, kudir info@corehumanitarianstandard.org

## Dib-u-eegis

Dhammaan faallooyinka la helo waxaa looga hadli doonaa dib-u-eegista CHS, kaasoo la qaadi doono kama dambeynta Diseembar 2019. Wixii macluumaad dheeraad ah ee kusaabsan Heerka Xuddunta Bani'aadamnimada, xogaha la xiriira iyo dukumiintiyada kale ee socda, fadlan booqo www.corehumanitarianstandard.org

## Qoraalka kusaabsan tarjumaadaha

Heerka Xuddunta baniaadminimada wuxuu diyaar ku ahaan doonaa Arabic, French iyo Spanish. Haddii aad jeclaan lahayd inaad u turjunto CHS luqad dheeri ah, fadlan la xiriir info@corehumanitarianstandard.org si aad u hesho hagitaan kusaabsan tarjumaadaha. Dhammaan tarjumaadaha waxay xor u ahaan doonaan in laga helo www.corehumanitarianstandard.org

## Qalabka la xiriira

Hagidda iyo qalab ayaa la heli karaa si loo taageero adeegsiga CHS waana bilaash in laga galo www.corehumanitarianstandard.org

# Jaan-tus


i. Hordhac 2 - 4

ii. Dhismaha Heerka Xuddunta Bani'aadamnimada ee Tayada iyo Isla-Xisaabtanka (CHS) 5

iii. Adeegsiga CHS 6 - 7

iv. Sheegashooyinka 7

v. Ficilka Bani-aadamnimada ee mab,da leh 8 - 9

vi. Sagaalka Ballanqaad iyo Shuruudaha Tayada 10 - 11

vii. Ballanqaadyada, ficilada iyo Mas'uuliyadaha 12 - 22

1. Bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey ayaa hela caawimaad ku habboon oo baahiyahooda la xiriirta. 12
2. Bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey ayaa marin u hela gargaarka bani'aadamnimada ee ay u baahan yihiin waqtiga saxda ah. 13
3. Bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey si taban uma saameyneyso wayna u diyaarsan yihiin, adkaysi u leeyihiin natiijo ahaana ka halis yar yihiin ficilka bani'aadamnimada 14 - 15
4. Bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey waxay garanayaan xuquuqdooda iyo waxa ay xaq u leeyihiin, waxay heli karaan macluumaad waxayna ka qayb qaadan karaan go'aamada iyaga saameeya. 16
5. Bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey waxay heli karaan amni iyo nidaamyo jawaab-celineed oo wax looga qabanayo cabashooyinka. 17
6. Bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey helaan caawimad dhameestir ah, Isku dubbaridan. 18
7. Bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey waxay filan karaan in la gaarsiiyo kaalmo hagaagsan maadaama ay ururadu wax ka baranayaan khibrada iyo milicsiga. 19

8. Bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey ayaa hela gargaarka waxay uga baahan yihiin shaqaale karti iyo maarayn wanaagsan leh iyo mutadawiciin. 20

9. Bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey ayaa filanaya in hay, adaha caawinaya iyaga ay si hufan, karti leh anshaxna leh u maareeyaan, ilaha kheyraadka 21 - 22

viii. Qaamuus 23 - 24

# Heerka xudunta bani'aadamnimada ee

## i. Hordhac

Maalin kasta adduunka oo dhan, dad aan tiro lahayn oo ka socda dhammaan qaybaha bulshada ayaa loo dhaqaajiyaa inay u dhaqmaan si looga jawaabo lagama maarmaanka bani'aadamnimada - rabitaanka ka hortagga iyo yareynta dhibaatada aadanaha meel kasta oo ay ku dhacdo.

Heerka Aasaasiga ah ee Bani'aadamnimada ee ku saleysan Tayada iyo La Xisaabtanka (CHS) wuxuu dejinayaa Sagaal Ballanqaadyo ay ururada iyo shaqsiyaadka ku lug leh ka jawaab celinta bani'aadamnimada ay u adeegsan karaan inay ku horumariyaan tayada iyo waxtarka gargaarka ay bixiyaan. sido kale wuxuu fududeeyaa la xisaabtanka weyn ee bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey: ogaanshaha waxa ay ururada samafalku u gaysteen waxay awood u siinaysaa inay la xisaabtamaan ururadaas.

CHS waxay meeleeysaa bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey bartamaha howlaha samafalka waxayna kobciyaan ixtiraamka xuquuqdooda aasaasiga ah ee aadanaha. Waa la hoosta ka xariiqay xuquuqda nolosha sharaf leh, iyo xuquuqda ilaalinta iyo nabadgelyada sida ku xusan sharciga caalamiga ah, oo ay ku jirto Sharciga Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha.[2]

Heer asaasi ah, CHS waxay qeexaysaa waxyaabaha aasaasiga u ah mabda'a, la xisaabtanka iyo waxqabad bani'aadamnimo oo tayo sare leh. Hay, adaha bani'aadamnimada waxay u isticmaali karaan si ikhtiyaari ah koodh ah oo ay ku waafajinayaan hawlahooda gudaha. Waxaa sidoo kale loo isticmaali karaa aasaas ahaan xaqiijinta waxqabadka, taas oo qaab gaar ah iyo tilmaamayaal la xiriira ay sameeyeen si loo hubiyo ku xirnaanshaha duruufaha iyo noocyada kala duwan ee ururka.

[2] Sharciga Caalamiga ah ee Xuquuqda waxaa ka mid ah Baaqa Caalamiga ee Xuquuqda Aadanaha, Axdiga Caalamiga ah ee Xuquuqda Dhaqaalaha, Xuquuqda Dhaqanka iyo Bulshada, iyo Axdiga Caalamiga ah ee Xuquuqda Madaniga iyo Siyaasadda iyo hab-maamuuskeeda Ikhtiyaariga ah.

CHS-ka waxaa dallacsiin kara oo hirgelin kara shakhsiyaad, ururro, hay'ado isku-dubbarida, iskaashatooyin iyo kooxo kale oo qabanaya ama gacan ka geysanaya waxqabadka bani'aadamnimada. In kasta oo ugu horreyn loogu talo galay waaxda bani'aadamnimada, haddana barnaamijka 'CHS' waxaa isticmaali kara hay'ad kasta si ay u keento tayo wanaagsan iyo isla xisaabtan ballaaran dhammaan dhinacyada ay la shaqeyneyso bulshada iyo dadka ay dhibaatadu saameysey.

Barnaamijka 'CHS' waa natiijada geedi socodka wadatashiga adduunka. Waxay isu keenaysaa cunsur muhiim u ah heerarka bani'aadamnimada ee hadda jira iyo ballanqaadyada. Kuwaas waxaa ka mid ah laakiin aan ku xaddidnayn:

- Xeerka Anshaxa ee Laanqeyrta Cas ee Caalamiga ah iyo Dhaqdhaqaaqa Bisha Cas iyo NGO-yada gargaarka Musiibada;
- Heerka HAP ee 2010 ee La Xisaabtanka iyo Maareynta Tayada
- Dadka ku jira Xeerka Gargaarka ee ku dhaqanka wanaagsan ee Maamulka iyo Taakulaynta Shaqaalaha Gargaarka;
- Buug-gacmeedka 'Sphere Handbook' Heerarka Muhiimka ah iyo Axdiga Bani'aadamnimada;
- Tayada COMPAS;
- Guddiyada Joogtada ah ee Hay'adaha u xilsaaran la xisaabtanka dadka ay dhibaatadu soo gaadhay Dadka / Dadka (CAAPs); iyo
- Hay,adda Iskaashiga Dhaqaalaha iyo Horumarinta (OECD) Gudiga Caawinta Horumarinta (DAC) Shuruudaha Qiimaynta Horumarka iyo Gargaarka Bani'aadamnimada.

## Heerka Aasaasiga ah ee Bani'aadamnimada ee ku saleysan Tayada iyo La Xisaabtanka



## ii. Heerka Aasaasiga ah ee Bani’aadamnimad

CHS waa go’an Sagaal Ballanqaadyo bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey iyagoo sheegaya waxa ay ka filan karaan ururada iyo shakhsiyaadka keenaya gargaarka bini’aadanimo. Ballanqaad kasta waxaa taageera Qiyaas tayo leh oo tilmaamaysa sida hay’adaha samafalka iyo shaqaalahu ay u shaqeynayaan si ay ula kulmaan. The CHS wuxuu u qaabeysan yahay sidan soo socota:

- Sagaalka Balanqaad;
- taageerida Shuruudaha Tayada;
- Tallaabooyin Muhiim ah oo la qaadayo si loo fuliyo Ballanqaadyada; iyo
- Mas’uuliyadaha Urur ee lagu taageerayo hirgelinta joogtada ah iyo nidaamsan ee Waxqabadyada Muhiimka ah ee ururka oo dhan.

Ficillada Muhiimka ah iyo Mas’uuliyadaha Urur, siday u kala horreeyaan, waxay sharxaan

- waxa shaqaalaha qabanaya howlaha bani’aadamnimada ay tahay inay sameeyaan si ay u gaarsiiyaan barnaamijyo tayo sare leh si joogto ah iyo inay la xisaabtamaan kuwa ay doonayaan inay caawiyaan; iyo
- siyaasadaha, geeddi-socodka iyo nidaamyada ururrada ku hawlan waxqabadka bani’aadamnimada waxay u baahan yihiin inay jiraan si loo hubiyo in shaqaalahoodu ay bixiyaan gargaar bani’aadamnimo oo tayo sare leh, lala xisaabtami karo .

Qaamuuska ereyada oo loo adeegsaday CHS oo leh qeexitaan gaar ah ayaa lagu soo daray dhamaadka dukumintigan.

## iii. Adeegsiga CHS

Hay'adaha u heellan CHS waxay ujeeddadeedu tahay inay fuliyaan dhammaan Sagaal Ballanqaad. Sida ugu yar uguyaraan, waxaa laga filayaa inay ka shaqeeyaan sidii si isdaba joog ah loo hagaajin lahaa nidaamyadooda, qaab dhismeedkooda iyo dhaqankooda si joogto ah kor loogu qaado tayada iyo la xisaabtanka jawaabahooda bani'aadamnimo. Si kastaba ha noqotee, ururada iyo shakhsiyaadka ku lug leh hawlaha bani'aadamnimada way kala duwan yihiin. Waxay u baahan yihiin inay ku dhaqmaan waqti ku habboon, oo ay la qabsadaan ficilladooda awoodaha iyo waajibaadka hay'addooda, iyo sidoo kale wajiga iyo xaaladda dhibaatada ay ku sugan yihiin.

Ururada marka ay la kulmaan dhibaatooyin fulintooda Sagaal Ballan, waa inay ay gartaan arintan isla markaana ay ka fiirsadaan sidii wax looga qaban lahaa arrimaha ka hor istaagaya inay sidaas sameeyaan. Ururradu waa inay wax ka bartaan xaaladaha sida kuwan oo kale, soo saarista habab looga gudbo caqabadaha ay la kulmaan.

Falanqeyn kasta oo ku saabsan codsiga CHS waa in lagu saleeyaa heerka ay urur kasta oo la shaqeeya ka shaqeynayo si loo gaaro Sagaal Ballanqaadyo oo aan si fudud ku saabsan haddii Waxqabadyada Muhiimka ah la hirgeliyay iyo / ama Waajibaadka Urur laga saaray Ficillada Muhiimka ah ee ay u baahan yihiin CHS, sidaa darteed, waxay u baahan yihiin in lala qabsado macnaha guud.

CHS waxay khuseysaa ururada iyo shaqsiyaadka:

- gaarsiinta gargaarka tooska ah bulshada iyo dadka ay dhibaatadu saameysey;
- ku wareeji taageero maaliyadeed, qalab ama farsamo ururada kale, laakiin ha ka galin si toos ah uga qayb qaadashada bixinta gargaar; ama
- Isku dar labada waji.

CHS waxaa loogu talagalay inay u adeegsadaan siyaabo kala duwan kuwa ku lugta leh howlaha bani'aadamnimada, oo ay ku jirto qaab:

- fududeeyo la xisaabtanka weyn ee bulshada iyo dadka ay dhibaatadu saameysey, iyo in kor loo qaado tayada adeegyada la siiyo;

- loo diyaariyo qorshooyin shaqo si loogu horumariyo hirgelinta CHS iyo horumar joogto ah
- in la kormeero tayada iyo la xisaabtanka, iyadoo la adeegsanayo barnaamijka 'CHS' oo ah qaab lagu taageerayo heerarka urur iyo farsamo ee jira;
- is-qiimeyn iyo hagaajinta tayada barnaamijyada;
- xaqiijiyo ama caddeeyo waafaqsanaanta, iyo muujinta u hoggaansamida kuwa kale; iyo
- qiimeeyaan, halka ay khuseyso, intee in le'eg howlaha gudaha iyo taageerada shaqaaluhu waxay la kulmaan waxqabadyada iyo mas'uuliyadaha urur ee lagu qeexay gudaha CHS.

hay,adaha go'aansada inay adeegsadaan CHS waa inay ka dhex horumariyaan ururkooda iyo dibadaba

Organisations working in partnerships should explain their commitment to the CHS, seek understanding of how their partners[3] approach the Nine Commitments and do whatever they can to work with them to implement the CHS commitments.

## iv. Sheegashooyinka

Shaqsi kasta ama hay,ad kasta oo ku lug leh howlaha bani'aadamnimada waxaa lagu dhiirrigelinayaa inay adeegsadaan oo ay qaataan CHS oo ay ku oran karaan: "waxaan ka shaqeyneynaa sidii loo adeegsan lahaa barnaamijka CHS" Hay,adaha waxaa oo ay sheegan karaan inay u hogaansamaan CHs haddii ay soo mareen xaqijin ujeedda oo ayada ka dhan ah.

[3] Eeg qeexitaanka qaamuuska.

## v. Ficilka Bani'aadamnimada ee Mab,da leh

Dadku waa udub dhexaadka waxqabadka bani'aadamnimada. Dhiirigelinta koowaad ee jawaab kasta ee dhibaatada waa in la badbaadiyo nolosha, la yareeyo dhibaatada aadanaha iyo in la taageero xuquuqda nolosha si sharaf leh

Ururada bani'aadamnimada waxay garwaaqsan yihiin in waajibaadka bani'aadamnimada uu ugu horreeyo oo sidaas darteed, ay raadsadaan, inay bixiyaan gargaar bani'aadamnimo meel kasta oo looga baahdo.

Waxqabadka bani'aadamnimada waxaa haga afar mabda 'oo si ballaaran loo aqbalay[4]:

- Dadnimada: Dhibaatada aadanaha waa in wax laga qabtaa meel kasta oo laga helo. Ujeedada waxqabadka bani'aadamnimada waa in la ilaaliyo nolosha iyo caafimaadka lana hubiyo ixtiraamka aadanaha.
- Dhex-dhexaadnimo: Waxqabadka bani'aadamnimada waa in la samey iyadoo lagu saleynayo baahida oo keli ah, iyadoo mudnaanta la siinayo xaaladaha ugu badan oo degdegga ah ee dhibaatada leh isla markaana aan la sameyn kala sooc iyado lagu salenayo aasaaska dhalshada, caqiidada diinta, dabaqadda ama aragtida siyaasadeed.
- Madax-bannaanida: Tallaabada bani'aadamnimadu waa inay ahaataa mid ka madax-bannaan ujeeddooyinka siyaasadeed, dhaqaale, milateri ama ujeeddooyinka kale ee jilaa kasta uu qaban karo ee la xiriira aagagga ay ka jiraan hawlaha bani'aadamnimadu. la fulinayo.
- Dhex-dhexaadnimada: Hawl wadeenada bani'aadamnimadu waa inaysan la safan dhinacyada dagaalka ama aysan ku lug yeelan khilaafaadka dabeecad siyaasadeed, midab, diin ama aragtiyeed.[5]

Mabaadi'da bani'aadamnimada ayaa udub dhexaad u ah dhammaan howlaha bani'aadamnimada. Waxay hagaan waxqabadka bani'aadamnimada codsigooduna waa mid muhiim u ah in lagu kala sooco ficillada bani'aadamnimada ee noocyada kale ee waxqabadyada iyo waxqabadka ah. CHS-ka, afarta mabda 'ayaa lagu dhex daray Ballanqaadyada, Shuruudaha Tayada, Ficillada Muhiimka ah iyo Mas'uuliyadaha Urur.

Sharciga Caalamiga ee Bani’aadamnimada, Sharciga Caalamiga ee Xuquuqda Aadanaha iyo Sharciga Caalamiga ee Qaxootiga ayaa dejiyay heerar aasaasi ah oo sharciyeed oo la xiriira ilaalinta shakhsiyaadka iyo kooxaha kooxaha, iyo nooca gargaarka ee iyaga la siin karo. Axdiga Bani’aadamnimada ee Sphere wuxuu soo koobayaa mabaadi’da aasaasiga ah ee sharciga ee inta badan saamaynaya samafalka kuwa ay saameeyeen musiibo ama isku dhac.

Kuwa ku dhaqma Heerka Bani’aadamnimada ee Muhiimka ah waxay aqoonsan yihiin mas’uuliyadda koowaad ee dawladaha iyo hay’adaha kale ee ay khusayso ee ah ilaalinta iyo caawinta kuwa ay saameeyeen musiibooyin ama iskahorimaadyada hubeysan ee ka socda dhulkooda. Waxqabadka bani’aadamnimadu waa inuusan wiiqin xilalkan ; runtii, mar kasta oo ay suurta gal tahay, waa inay dhammaystirto.

[4] Mabaadi’da aadanaha, eex la’aanta, madax-bannaanida iyo dhex-dhexaadnimada waxaa laga soo qaatay: Aasaasiga Mabaadi’da Cas Cas ee Caalamiga ah Dhaqdhaqaaqa Laanqeyrta Cas iyo Bisha Cas ayaa looga dhawaaqay magaalada Vienna sanadkii 1965 shirkii 20aad ee Caalamiga ee Laanqeyrta Cas iyo Bisha Cas; Go’aankii Golaha Guud ee Qaramada Midoobay (UN) ee 46/182, 19 Diseembar 1991; iyo Qaraarkii Golaha Guud ee Qaramada Midoobay 58/114, 5 Febraayo 2004.

[5] Ururada qaar, in kasta oo ay ka go’an tahay inay bixiyaan caawinaad aan eex lahayn oo aysan dhinac ka raacin dagaallada, ma tixgelinayaan in mabda’a dhexdhexaadnimadu ay ka horreyso u doodista arrimaha. laxisaabtanka iyo cadaalada.

## vi. Sagaalka Ballanqaad iyo Tayada Shuruudaha



1. Bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu samaysay ayaa hela caawimaad ku habboon oo baahiyahooda la xiriirta.
Shuruud Tayo leh: Jawaab-soo celinta biina-aadamnimada waa mid ku habboon oo sax ah



2. Bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey ayaa marin u hela gargaarka bani’aadamnimada ee ay u baahan yihiin waqtiga saxda ah.
Shuruud Tayo leh: Jawaab-soo celinta biina-aadamnimada waa mid wax ku ool ah oo waqtigeeda ku habboon.



3. Bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey si taban uma saameyneyso wayna u diyaarsan yihiin, adkaysi u leeyihiin natiijo ahaana ka halis yar yihiin ficilka bani’aadamnimada.
Shuruudaha Tayada: Jawaab-celinta bina-aadamnimada waxay xoojineysaa awoodaha maxalliga ah waxayna ka hortageysaa saameynta xun.



4. Bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey waxay garanayaan xuquuqdooda waxa ay xaq u leeyihiin, waxay heli karaan macluumaad waxayna ka qayb qaadan karaan go’aamada iyaga saameeya.
Shuruud Tayo leh: Jawaab-celinta bani’aadamnimada waxay kusaleysan tahay isgaarsiin, kaqaybgal iyo jawaab celin.



5. Bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey waxay heli karaan amni iyo nidaamyo jawaab-celineed oo wax looga qabanayo cabashooyinka.
Shuruudaha Tayada: Cabashooyinka waa la soo dhaweynayaa waxna laga qabanayaa.



6. Bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey helaan caawimad dhameestir ah, Iskuna dubbaridan.
Shuruud Tayo leh: Jawaab-soo celinta biina-aadamnimada waa la isku duway oo la isbiirsaday.



7. Bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey waxay filan karaan in la gaarsiiyo kaalmo hagaagsan maadaama ay ururadu wax ka baranayaan khibrada iyo milicsiga.
Shuruudaha Tayada: Hawl wadeenada bani'aadamnimada waxay tahay isdaba joog ah wax u bartaan oo aad horumariyaan.



8. Bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey ayaa hela gargaarka waxay uga baahan yihiin shaqaale karti iyo maarayn wanaagsan leh iyo mutadawiciin.
Shuruudaha Tayada: Shaqaalaha waxaa lagu taageeray inay shaqad ufan u gutaan, waxaana loola dhaqmaa si cadaalad iyo sinaan ah.



9. Bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey ayaa filanaya in hay,adaha caawinaya iyaga ay si hufan, karti leh, anshaxna leh u maareeyaan ilaha kheyraadka.
Shuruudaha Tayada: Kheyraadka waxaa loo maamulaa oo loo adeegsadaa si masuuliyad leh ujeedkooda loogu talagalay.

# vii. Ballanqaadyada, Ficilada iyo Mas'uuliyadaha

## 1. Bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey ayaa hela caawimaad ku habboon oo baahiyahooda la xiriirta.

Shuruud Tayo leh: Jawaab-soo celinta biina-aadamnimada waa mid ku habboon oo sax ah.

**Falalka Muhiimka ah**

**1.1** Samee falanqeyn nidaamsan, ujeedo iyo socda oo ku saabsan macnaha guud iyo daneeyayaasha.

**1.2** Naqshadeynta iyo hirgelinta barnaamijyada ku habboon iyadoo lagu saleynayo qiimeynta eex la'aanta ah ee baahiyaha[6] iyo halista, iyo f ahamka dayacanka iyo awooda kooxaha kala duwan[7]

**1.3** Laqabso barnaamijyada si loo beddelo baahiyaha, awoodaha iyo macnaha guud

**Masuuliydaha Ha,adeed**

**1.4** Siyaasadaha waxaa ka go'an inay bixiyaan gargaar dhexdhexaad ah oo ku saleysan baahida iyo awoodaha bulshada iyo dadka ay dhibaatadu saameysey.

**1.5** Siyaasadaha ayaa dejiyay ballanqaadyo tixgelinaya kala-duwanaanta bulshada, oo ay ku jiraan dadka liita ama kuwa la hayb-sooco, iyo ururinta xogta la kala saaray.

**1.6** Nidaamyada ayaa jira si loo hubiyo in si ku habboon loo falanqeeyo duruufaha

[6] Baahiyaha" waxaa ka mid ah caawimaad iyo ilaalin.

[7] Tani waxay tixraaci kartaa, tusaale ahaan: dumarka, ragga, gabdhaha, wiilasha, dhalinyarada, iyo dadka waayeelka ah, iyo waliba dadka leh naafonimo iyo dadka laga tiro badan yahay oo gaar ah ama qowmiyado gaar ah oo aan kala sooc lahayn.

## 2. Bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey ayaa marin u hela gargaarka bani'aadamnimada ee ay u baahan yihiin waqtiga saxda ah.

Shuruud Tayo leh: Jawaab-soo celinta biina-aadamnimada waa mid wax ku ool ah oo waqtigeeda ku habboon.

**Falalka Muhiimka ah**

**2.1** Samee barnaamijyo wax ka qabta caqabadaha si tallaabada la soo jeediyay ay u noqoto mid macquul ah oo ammaan u ah bulshada.

**2.2** Ku keen jawaabta bani'aadamnimada waqti ku habboon, go'aan qaadasho iyo ficil la'aan daahitaan aan loo baahnayn.

**2.3** U dir wixii baahiyo ah ee aan la daboolin ururadaas oo leh khibrad farsamo iyo waajibaad, ama u doode baahiyahaas in wax laga qabto.

**2.4** U adeegso heerarka farsamo ee ku habboon iyo ku dhaqanka wanaagsan ee laga shaqeeyo guud ahaan waaxda bani'aadamnimada si loo qorsheeyo loona qiimeeyo barnaamijyada.

**2.5** La soco dhaqdhaqaaqyada, wax soo saarka iyo natiijooyinka jawaabaha bani'aadamnimada si loo waafajiyo barnaamijyada loona wajaho waxqabadka liita.

**Masuuliydaha Ha,adeed**

**2.6** Ballanqaadyada barnaamijku waxay la jaan qaadayaan awoodda hay'adeed

**2.7** Ballanqaadyada siyaasaddu waxay xaqiijinayaan:

a. nidaamsan, ujeedo iyo kormeer joogto ah iyo qiimeyn waxqabadyada iyo saameyntooda;

b. caddeynta ka timid kormeerka iyo qiimeynta waxaa loo isticmaalaa in lagu waafajiyo laguna hagaajiyo barnaamijyada; iyo

c. go'aan qaadasho waqtigeeda ku habboon iyadoo loo qoondeeyay ilaha si waafaqsan.

## 3. Bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey si taban uma saameyneyso wayna u diyaarsan yihiin, adkaysi u leeyihiin natiijo ahaana ka halis yar yihiin ficilka bani'aadamnimada

Shuruudaha Tayada: Jawaab-celinta bina-aadamnimada waxay xoojineysaa awoodaha maxalliga ah waxayna ka hortageysaa saameynta xun.

**Falalka Muhiimka ah**

**3.1** Hubinta barnaamijyadu inay ku dhismaan awoodaha maxalliga ah isla markaana ka shaqeeyaan hagaajinta u adkaysiga bulshada iyo dadka ay dhibaatadu saameysey.

**3.2** U adeegso natiijooyinka halista bulshada jirta iyo qiimeynta halista iyo qorshooyinka u diyaargarowga si aad u hagto howlaha.

**3.3** Awood u yeelo horumarinta hoggaanka maxalliga ah iyo ururrada awooddooda oo ah jawaabeyaasha ugu horreeya haddii ay dhacaan dhibaatooyin mustaqbalka dhaca, iyagoo qaadaya tillaabooyin lagu hubinayo in kooxaha la hayb sooco iyo kuwa tabaalaysan ay si habboon u matalaan.

**3.4** Qorshee kala-guur ama istiraatiijiyad ka bixitaan marxaladaha hore ee bina-aadamnimada barnaamijka kaas oo hubiya saameynta togan ee muddada-dheer isla markaana yareeya halista ku-tiirsanaanta

**3.5** Naqshada iyo hirgelinta barnaamijyada dhiirrigeliya ka soo kabashada aafada hore iyo oo ka faa'iideysta dhaqaalaha maxalliga ah.

**3.6** Aqoonsadaan oo ku dhaqmaan saameynta taban ee suurtagalka ah ama dhabta ah ee aan ku talagalin waqtiga iyo nidaamka, oo ay ku jiraan meelaha:
a. amniga dadka, amniga, sharafta iyo xuquuqda;
b. dhiig-miirashada iyo xadgudubka galmada ee shaqaalaha;
c. dhaqanka, jinsiga, iyo xiriirka bulshada iyo siyaasadeed;
d. habnololeedka;
e. dhaqaalaha deegaanka; iyo
f. deeganka.

**Masuuliydaha Ha,adeed**

**3.7** Siyaasadaha, xeeladaha iyo hagitaanka waxaa loogu talagalay:

a. in laga hortago barnaamijyada leh waxyeellooyin taban, sida, tusaale ahaan, dhiig-miirashada, ku-xadgudubka ama takooridda ay shaqaalaha ku hayaan bulshada iyo dadka ay dhibaatadu saameysey; iyo

b. xoojinta awoodaha maxalliga ah.

**3.8** Nidaamyo ayaa jira si loo ilaaliyo macluumaad kasta oo shaqsi ah oo laga soo ururiyo bulshada iyo dadka ay saameeyeen dhibaatooyinka kuwaas oo qatar galin kara.

## 4. Bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey waxay garanayaan xuquuqdooda iyo waxa ay xaq u leeyihiin, waxay heli karaan macluumaad waxayna ka qayb qaadan karaan go'aamada iyaga saameeya.

**Shuruud Tayo leh:** jawaab-celinta bani'aadamnimada wuxuu ku saleysan yahay xiriir, ka qaybgal iyo jawaab celin

**Falalka Muhiimka ah**

**4.1** U fidiyaan macluumaad bulshada iyo dadka ay dhibaatadu saameysey ee ku saabsan ururka, mabaadi'da ay u hoggaansan tahay, sida ay uga rajeynayso shaqaalaheeda inay u dhaqmaan, barnaamijyada ay fulinayso iyo waxa ay damacsan yihiin inay bixiyaan.

**4.2** Ku wada hadal luqadaha, qaababka iyo warbaahinta si fudud loo fahmi karo, xushmad iyo dhaqan ahaanba ugu habboon xubnaha kala duwan ee bulshada, gaar ahaan kooxaha nugul iyo kuwa la takooro.

**4.3** Hubinta matalaaddu waa mid loo wada dhan yahay, oo ku lug leh ka qaybgalka iyo ka qayb qaadashada bulshada iyo dadka ay dhibaatadu saameysey dhammaan heerarka shaqada.

**4.4** Ku dhiiri geli oo u fududee bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey inay bixiyaan jawaab celin ku saabsan heerkooda ku qanacsanaanta tayada iyo waxtarka kaalmada la helay, iyadoo si gaar ah isha loogu hayo jinsiga, da'da iyo kala duwanaanshaha kuwa bixiya jawaab celinta.

**Waajibaadka Urur**

**4.5** Siyaasadaha wadaagga macluumaadka ayaa jira, waxayna kobcinayaan dhaqanka furitaanka isgaarsiinta.

**4.6** Siyaasado ayaa jira oo loogu talagalay kaqeybgalinta bulshada iyo dadka ay saameeyeen dhibaatooyinka, oo ka tarjumaysa ahmiyadaha iyo halista ay dhammaan heerarka shaqada ku aqoonsadaan.

**4.7** Isgaarsiinta dibedda, oo ay ku jiraan kuwa loo adeegsado ujeeddooyin uruurinta, waa sax, anshax iyo xushmad leh, waxay u soo bandhigayaan bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey sida aadanaha sharaf leh

## 5. Bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey waxay heli karaan amni iyo nidaamyo jawaab-celineed wax looga qabanayo cabashooyinka.

Shuruudaha Tayada: Cabashooyinka waa la soo dhaweynayaa waxna laga qabanayaa.

**Falalka Muhiimka ah**

**5.1** La tasho bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey ee ku saabsan qaabeynta, hirgelinta iyo la socodka geeddi-socodka maaraynta cabashooyinka

**5.2** Soo dhawow oo aqbal cabashooyinka, oo u gudbi sida farsamadu u noqon karto la heli karo iyo baaxadda arrimaha ay wax ka qaban karto.

**5.3** U maaree cabashooyinka hab wakhti ku habboon, cadaalad ah oo ku habboon oo mudnaanta siinaya badbaadinta cabashada iyo kuwa ay khusayso heerar kasta

**Masuuliydaha Ha,adeed**

**5.4** Nidaamka cabashooyinka loo maareeyo ee loogu talagalay bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey waa la diiwaangeliyey oo waa la hayaa. Nidaamku waa inuu daboolaa barnaamijyada, dhiig-miirashada galmada iyo ku-xadgudubka, iyo ku takri-falka kale ee awoodda.

**5.5** Dhaqan urureed oo cabashooyinka si dhab ah loo tixgeliyo laguna dhaqmo iyadoo la raacayo siyaasado iyo habab qeexan ayaa la aasaasay.

**5.6** Bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey waxay si buuxda uga warqabaan dhaqanka laga filayo shaqaalaha samafalka, oo ay ku jiraan ballanqaadyada abaabul ee laga sameeyey ka hortagga dhiig-miirashada iyo xadgudubka galmada.

**5.7** Cabashooyinka aan ku dhicin baaxadda hay'adda waxaa loo gudbiyaa dhinac khuseeya qaab waafaqsan dhaqanka wanaagsan.

## 6. Bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey helaan caawimad dhameestir ah, Iskuna dubbaridan.

**Shuruud Tayo leh:** jawaab-celinta bani'aadamnimada waa la isku duway oo la isbiirsaday.

**Falalka Muhiimka ah**

**6.1** Aqoonso doorka, masuuliyadaha, awoodaha iyo danaha daneeyayaasha kala duwan.[9]

**6.2** Hubi in jawaabta bani'aadamnimada ay dhammaystireyso tan dowladda iyo kuwa maxalliga ah[10] iyo hay'adaha kale ee samafalka.

**6.3** Kaqeybqaado hay'adaha iskudubaridka ee khuseeya lanashaqee kuwa kale si looyareeyo dalabyada ka imanaya bulshada loona kordhiyo fidinta iyo adeeg bixinta dadaallada ballaaran ee bani'aadamnimada.

**6.4** La wadaag macluumaadka lagama maarmaanka ah wada-hawlgalayaasha, kooxaha isku-dubbaridka iyo kuwa kale ee ku habboon iyada oo loo marayo wadiiqooyinka isgaarsiinta ee habboon.

**Masuuliydaha Ha,adeed**

**6.5** Siyaasadaha iyo istiraatiijiyadda waxaa ka mid ah ballanqaad cad oo ku aaddan isku-duwidda iyo wadashaqeynta dadka kale, oo ay ku jiraan mas'uuliyiinta qaranka iyo kuwa maxalliga ah, iyada oo aan wax u dhimeyn mabaadi'da bani'aadamnimada.

**6.6** La shaqaynta shuraakada waxaa xukuma heshiisyo cad oo isdaba-joog ah oo ixtiraama lamaanaha waajibaadka, waajibaadka iyo madax-bannaanida, isla markaana aqoonsada caqabadaha iyo ballanqaadyada u gaarka ah.

[9] Oo ay ku jiraan jilayaasha maxaliga ah, ururada samafalka, maamulada maxalliga ah, shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo kooxaha kale ee ay khuseyso.

[10] Meesha ay mas'uuliyiintu qayb ka yihiin dhinacyada isku dhaca ka shaqeeya arrimaha bani'aadam nimada waa inay adeegsadaan xukunkooda markay tahay u madaxbanaanida ficilka, ilaalinta danaha bulshada iyo dadka ay dhibaatadu saameysey ee ku taal xarunta bartanka go'aankooda.

## 7. Bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey waxay filan karaan in la gaarsiiyo kaalmo hagaagsan maadaama y ururadu wax ka baranayaan khibrada iyo milicsiga.

Shuruudaha Tayada: Hawl wadeenada bani'aadamnimada waxay tahay isdaba joog ah wax u bartaan oo aad horumariyaan.

**Falalka Muhiimka ah**

**7.1** Ka faa'iideyso casharrada la bartay iyo waayo-aragnimadii hore markii la sameynayay barnaamijyada.

**7.2** Kasbato, ikhtiraacdo oo hirgeliso isbeddellada ku saleysan kormeerka iyo qiimeynta, iyo jawaab celinta iyo cabashooyinka.

**7.3** La wadaag waxbarashada iyo hal-abuurka gudaha, bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey, iyo daneeyayaasha kale.

**Masuuliydaha Ha,adeed**

**7.4** Qiimeynta iyo siyaasadaha barashada ayaa jira, macnahooduna waa la heli karaa si wax looga barto waaya-aragnimada loona horumariyo ku-dhaqanka.

**7.5** Farsamooyin ayaa jira si loo duubo aqoonta iyo waaya-aragnimada, oo looga dhigo mid la heli karo inta lagu jiro hay,adda.

**7.6** Ururku wuxuu gacan ka geystaa barashada iyo hal-abuurnimada wax ka qabashada bani'aadamnimada ee ka dhexeysa asxaabta iyo qaybaha.

## 8. Bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey ayaa hela gargaarka waxay uga baahan yihiin shaqaale karti iyo maarayn wanaagsan leh iyo mutadawiciin.

Shuruud Tayo leh: Shaqaalaha waxaa lagu taageeray inay shaqadooda si hufan u gutaan, waxaana loola dhaqmaa si cadaalad ah oo sinaan.

**Falalka Muhiimka ah**

**8.1** Shaqaaluhu waxay u shaqeeyaan si waafaqsan waajibaadka iyo qiyamka ururka iyo ujeeddooyinka la isku raacay iyo heerarka waxqabadka.

**8.2** Shaqaaluhu waxay u hoggaansamaan siyaasadaha iyaga khuseeya waxayna fahmaan cawaaqibka ka dhalan kara iyaga oo aan u hoggaansamin.

**8.3** Haqaaluhu waxay horumariyaan oo adeegsadaan shaqsiyaadka, farsamada iyo maamulka loo baahan yahay kartida si ay u gutaan kaalintooda una fahmaan sida ururku u taageeri karo si ay tan u sameeyaan.

**Masuuliydaha Ha,adeed**

**8.4** Hay,adda wuxuu leeyahay maamul iyo karti shaqaale iyo karti uu ku bixiyo barnaamijyadiisa.

**8.5** Nidaamyada iyo nidaamyada shaqaaluhu waa cadaalad, hufan, midab takoor la'aan iyo waafaqsan sharciga shaqaalaha ee deegaanka.

**8.6** Sharaxaadda shaqada, ujeeddooyinka shaqada iyo hababka jawaab celinta ayaa jira si shaqaaluhu u yeeshaan faham cad waxa looga baahan yahay iyaga

**8.7** Nidaam anshaxeed ayaa jira oo dejinaya, ugu yaraan, waajibaadka shaqaaluhu inaysan ka faa'iidaysan, ku xadgudbin ama si kale u takoorin dadka.

**8.8** Xeerar ayaa jira oo lagu taageerayo shaqaalaha si kor loogu qaado xirfadahooda iyo kartidooda.

**8.9** Xeerar ayaa loo dejiyey amniga iyo ladnaanta shaqaalaha.

[11] Shaqaaluhu waa: wakiil kasta oo loo magacaabay hay'adda, oo ay ku jiraan kuwa qaran, caalami, joogto ah ama shaqaale muddo gaaban ah , iyo sidoo kale mutadawiciin iyo la taliyayaal.

## 9. Bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey ayaa filanaya in hay,adaha caawinaya iyaga ay si hufan, karti leh anshaxna leh u maareeyaan, ilaha kheyraadka,

Shuruudaha Tayada: Kheyraadka waxaa loo maamulaa oo loo adeegsadaa si masuuliyad leh ujeedkooda loogu talagalay.

**Falalka Muhiimka ah**

**9.1** Barnaamijyada nashqadeynta iyo hirgelinta habraacyada si loo hubiyo in si hufan loo isticmaalo ilaha[12], isku dheelitirka tayada, kharashka iyo waqtiga ee wajiga kasta ee jawaabta.

**9.2** Maareyn oo adeegso ilaha si aad u gaarto ujeedadooda loogu talagalay, adigoo yareynaya qashinka.

**9.3** La soco oo ka warbixi kharashaadka miisaaniyadda.

**9.4** Markaad isticmaaleyso kheyraadka deegaanka iyo kuwa dabiiciga ah, tixgeli saameynta ay ku leeyihiin deegaanka.

**9.5** Maaree khatarta kala qaadashada islaamka qaadashada tallaabada ku habboon haddii la aqoonsado.

**Masuuliydaha Ha,adeed**

**9.6** Siyaasadaha iyo hababka xukuma isticmaalka iyo maaraynta kheyraadka ayaa jira, oo ay ku jiraan sida ururku:

a. wuxuu aqbalaa oo u qoondeeyaa lacag iyo hadiyado nooc ah anshax ahaan iyo sharci ahaan;

b. waxay u adeegsataa kheyraadkeeda qaab mas'uul ka ah deegaanka;

c. wuxuu ka hortagayaa waxna ka qabanayaa fikradahaasu, khayaanada, khilaafaadka danaha iyo ku takrifalka kheyraadka;

d. wuxuu sameeyaa xisaab hubin, wuxuu xaqiijiyaa u hogaansanaanta iyo warbixinnada si daah furan;

e. qiimeeyaa, maamushaa oo yareysaa halista si joogto ah; iyo
f. waxay hubisaa in aqbalaadda kheyraadka aysan wax u dhimayn madax-bannaanideeda.

[12] Ereyga "khayraad" waa in lagu fahmaa macno ahaan ballaadhan, oo ka kooban waxa ururku u baahan yahay si uu u guto himiladiisa, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn: dhaqaalaha, shaqaalaha, badeecada, qalabka, waqtiga, bedka dhulka, carrada, biyaha, hawada, wax soo saarka dabiiciga ah iyo guud ahaan deegaanka.

# viii. Qaamuus

Ujeeddooyinka CHS, qeexitaannada soo socda ayaa khuseeya:

La Xisaabtanka: habka isticmaalka awoodda si xilkasnimo leh, tixgalinta, iyo la xisaabtanka, daneeyayaasha kala duwan, iyo ugu horreyn kuwa ay saameysay jimicsiga awooda noocaas ah.

Bulshooyinka iyo dadka ay dhibaatadu saameysey: wadarta guud ee haweenka, raga, gabdhaha iyo wiilasha leh baahiyo kaladuwan, nuglaanta iyo awoodaha ay saameeyeen masiibooyinka, iskahorimaad, saboolnimo ama dhibaatooyin kale oo ka dhaca goob cayiman.

Dukumenti: nooc kasta oo duubitaan ah wadahadallada, heshiisyada, go'aammada iyo / ama ficillada dib loo tarmi karo.

Waxtarka: ilaa xadka ay howlaha gargaarku ku gaaraan ujeedooyinkooda. Karti: ilaa heerka waxsoosaarka barnaamijyada bani'aadamnimada, tayo iyo tiroba, lagu gaaro natiijada wax soo saarka.

Hawlgelinta: hababka ay ururadu u wada xidhiidhaan, la tashadaan iyo / ama u siiyaan ka qaybqaadashada daneeyayaasha iyo / ama daneeyayaasha ay khusayso, hubinta in tabashooyinkooda, rabitaanka, filashooyinka, baahiyaha, xuquuqda iyo fursadaha waxaa lagu tixgeliyaa dejinta, hirgelinta iyo dib u eegista barnaamijyada iyaga ka caawinaya.

Waxqabadka bani'aadamnimada: tallaabo loo qaaday iyada oo ujeedadu tahay badbaadinta nafta, yareynta dhibaataynta iyo ilaalinta sharafta aadanaha inta lagu jiro iyo ka dib dhibaatooyinka bini-aadamka sababay iyo masiibooyinka dabiiciga ah, iyo sidoo kale ficil looga hortago loona diyaar garoobo.[13]

Abaabul: hay'ad leh qaab dhismeed maamul iyo awood ay ku dabakho CHS.

Wada-hawlgalayaasha: ururada si wada jir ah uga dhex shaqeeya nidaam rasmi ah si loo gaaro himilo gaar ah doorarka iyo waajibaadka lagu heshiiyey.

Siyaasad: bayaan dukumiinti ah oo ujeedka iyo xeerarka go'aan qaadashada ah.

Ilaalinta: dhammaan howlaha loogu talagalay in lagu hubiyo ixtiraam buuxa oo loo siman yahay ee xuquuqda shakhsiyaadka oo dhan, iyadoon loo eegin da'da, jinsiga, jinsiyadda, bulshada, diin ama taariikh kale. Waxay ka gudubtaa waxqabadyada naf-badbaadinta degdegga ah ee degdegga ah oo inta badan diiradda la saaro inta lagu jiro xaaladahadegdegga ah.

Tayada: wadarta guud ee astaamaha iyo astaamaha gargaarka bani'aadamnimada ee taageeraya awooddeeda, si ay waqtiga, ugu qanciso baahida iyo rajooyinka la sheegay ama la sheegay, iyo ixtiraamka karaamada dadka ay hiigsaneyso inay caawiso.

Adkeysi: kartida bulshada ama bulshada u nugul khataraha inay iska caabbiyaan, dhuuqaan, soo dhaweynta iyo ka soo kabashada saameynta halista waqti ku habboon oo hufan.

Shaqaalaha: wakiil kasta oo loo magacaabay urur, oo ay ku jiraan qaran, caalami, iyo shaqaale joogto ah ama waqti gaaban ah, iyo waliba mutadawiciin iyo la taliyayaal.

[13] Sida lagu qeexay Tilmaamaha Duuliyaha Waxqabadka Bani'aadamnimada ee ALNAP Qiimeynta, 2013, p.14.

Heerka Aasaasiga ah ee Bani'aadamnimada ee ku saleysan Tayada iyo La Xisaabtanka (CHS) wuxuu dejinayaa Sagaal Ballanqaadyo ay ururada iyo shakhsiyaadka ku lug leh ka jawaab celinta bani'aadamnimada ay u adeegsan karaan hagaajinta tayada iyo waxtarka gargaarka ay bixiyaan. Waxay sidoo kale fududeeysaa la xisaabtanka weyn ee bulshada iyo dadka ay dhibaatadu saameysey: iyadoo la ogyahay waxa ururada samafalku u sameeyeen inay u suurta gelinayso inay hay'adahaas la xisaabtamaan.

Sida heerka asaasiga ah, CHS waxay sharxaysaa astaamaha lagama maarmaanka u ah waxqabadka, mabda'a, la xisaabtanka ee tayada sare leh. Ururada bani'aadamnimada waxay u isticmaali karaan inay noqdaan baaq sir ah oo iskaa wax u qabso ah oo ay ku waafajinayaan hawlahooda gudaha. Waxaa sidoo kale loo isticmaali karaa xaqiijinta aasaasiga ah ee  waxqabadka

CHS waa natiijada 12-bilood, seddex marxaladood oo wadatashi ah oo ay fududeysay HAP International, People In Aid iyo Sphere Project, mudadaas oo boqolaal qof oo shakhsiyaad iyo ururoba ay si adag u falanqeeyeen waxa ku jira CHS waxayna ku tijaabiyeen xarunta dhexe iyo xarunta shaqada.

corehumanitarianstandard

@corehumstandard

www.corehumanitarianstandard.org | info@corehumanitarianstandard.org